Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Togan:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

**Urgent Positive SCID, Family Fact Sheet—Somali**

# Daciifka Difaaca Jirka ee Isku Dhafan ee Daran ((SCID) ee Degdega ah

## Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu qabin ama uu qabo heerarka hooseeya ee T-cell receptor excision circles (TRECs). TREC-yada waxaa abuura unugyada gaarka ah ee dhiiga cad oo la yiraahdo T-cells kuwaasoo gacan ka gaysta kahortaga caabuqa iyo xanuunka.

## Maxay tani ka dhigan tahay?

Natiijada xanuunka lagu helay ayaa ka dhigan in ilmahaagu u baahan yahay baaritaan kale si loo eego haddii nidaamka difaaca ee la dagaala caabuqa uu si wacan u shaqeynaayo. Natiijada laga helay ayaan ka dhignayn in ilmahaagu qabo SCID, laakiin baaritaan ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo.

## Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarka cunugaaga ama khabiirka oo yaqaana SCID ayaa kaa caawin doona diyaarinta baaritaanno dheeri ah. Ilmahaaga waa inuu sidoo kale qaabilaa taqasuslaha difaaca jirka ama taqasuslaha xanuunka caabuqa.

Sabab la xiriirta in xanuunnada guud ee carruurta qaba SCID ay keeni karaaan geeri, waa muhiim in la ilaaliyo caafimaadka ilmaha iyo qoyska. Ilaa inta natiijooyinka baaritaanka dheeraadka ah soo laabanayaan, dhakhaatiirta ilmahaaga ayaa doonaaya in qoyskaagu iska ilaaliyo la kulmida dadka kale ee ka baxsan gurigaaga, gaar ahaana dadka xanuunsanaan kara ama dhawaan qaatay talaalka. Dhakhtarkaaga ayaa sidoo kale kuu sheegi kara sida jeermisyada looga hortago marka aad ilmaha quudinayso.

## Waa maxay SCID?

SCID waa xanuun ilmuhu ku dhasho kaas oo jidhku uusan lahayn nidaamka difaaca oo si fiican u shaqeynaaya. Haddii uusan lahayn nidaamka difaaca oo shaqeynaaya, jidhka ayaan awoodin inuu la dagaalamo caabuqyada. Caabuq fudud ayaa xaalad xun gelin kara ilmaha qaba SCID.

## Waa maxay dhibaatooyinka caafimaad ee uu keeni karo?

Haddii aan la dawayn, SCID ayaa sababi kara:

- Caabuq joogto ah, oo daran
- Shuban
- Finanka maqaarka

Carruurta qaba SCID ayaa ka faa'iideysan kara daawaynta degdega ah ee taxadarka badan.

## Waa maxay fursadaha daaweynta ee jira?

Daawaynta ilmaha qaba SCID waxaa ku jiri kara:

- Baxnaaninta badelida Immunoglobulin
- Baxnaaninta badelida enzymes
- Antibiyootig/daawooyinka jeermiska dila si looga hortago caabuqa

Hase yeeshee, talaalka dhuuxa lafaha ee guuleysta ayaa ah daawada ugu waxtarka badan. Talaallada dhuuxa lafaha ayaa sida ugu fiican la sameeyaa sadexda bilood ee ugu horaysa nolosha kahor inta aan caabuq ku dhicin.

Ilmaha qaba SCID waa inay u tagaan dhakhtarkooda caadiga ah iyo dhakhtar ku taqasusay SCID.

## Dhigaalada

**Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:**
http://ghr.nlm.nih.gov

**Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:**
www.savebabies.org

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:**
www.babysfirsttest.org

DEPARTMENT OF HEALTH
Newborn Screening Program, 601 Robert St. N., St. Paul, MN 55155
Taleefanka (800) 664-7772, Fakiska (651) 215-6285 ***turjumaano ayaa diyaar ah***
DIB-LOO-EEGAY 09/2022